




Ansa iyo Bansa

-Sheeko ka timid Bakistaan

Ansa og Bansa

- En fortelling fra Pakistan



Beribaa waxaa jiray duur weyn oo mudgi ah oo ku yaalay meel u dhow tuulo yar oo ku taalay Bakistaan.

Det var en gang. En stor mørk jungel i nærheten av en liten landsby i Pakistan.



Halkaas waxaa ku noolaa ri' iyo labadeedii waxarood. Waxaa lagu magacaabi jiray Ansa iyo Bansa.

Der bodde det en geitemamma med de to små geitekillingene sine. De het Ansa og Bansa.



Maalin ayey ridii doonaysay in ay howl magaalada ugu baxdo oo ay xoogaa ay maqnaato. Waxa ay ku tiri labadii waxarood in ay u balan qaadaan in aysan qof aan iyada ahayn albaabka ka furin, saas ayeyna balan qaadeen.

En dag skulle geitemammaen ut på et ærend i byen og være borte en stund. Hun sa til de to barna sine at de måtte love å ikke åpne døren for noen andre enn henne, og det lovet de.



Ridii magaalada ayey aaday halka Ansa iyo Bansa kaligood guriga joogeen.

Geitemammaen gikk til byen mens Ansa og Bansa var alen igjen hjemme.



Gurigu shanqar la'aan ayuu ahaa oo Ansa iyo Bansa xoogaa waa ay cabsadeen.

Det var helt stille i huset og Ansa og Bansa ble litt redde.



«DHAG, DHAG, DHAG!» Albaabka ayaa la soo garaacay. «Waa kuma» ayey Ansa iyo Bansa yiraahdeen.

«BANK, BANK, BANK!» Det banket på døren. «Hvem er det?» sa Ansa og Bansa.



«Yaab. Waa, waa, waa aniga. Hooyadiin oo gurigga timid kana timid tuuladii.! Aan soo galo!»

«Kremt. Det, det, det er meg, moren deres som har kommet hjem fra landsbyen! Slipp meg inn!»



Ansa ayaa tiri: «Kaasi uma eka codkii hooyo.» Bansa ayaa tiri: “haa, waa saxan tahay, codkii hooyo oo kale ma ahan. Laakiin yuu noqon karaa hadaba? Albaabka ayaan furaynaa oo fiirinaynaa. ” Albaabka ayey si tartiib ah u fureen oo waxa ay arkeen: Libaax khatar ah oo weyn kaas oo bilaabay inuu xoog albaabka ku soo riixo.

Ansa sa: «Det der høres ikke ut som mamma.» Bansa sa: “Ja, du har rett, det høres ikke ut som mamma. Men hvem kan det være da? Vi åpner døren og ser.” De åpnet døren på gløtt og der så de: En stor farlig løve som begynte å presse seg inn gjennom døra.



Libaaxii waa u suurowday inuu toos guriga gudihiisa u soo galo. Afkiisii weynaa ayuu furay oo laqay labadoodiiba, Ansa iyo Bansa.

Løven klarte å komme seg gjennom og helt inn i huset. Den åpnet opp den store kjeften sin og slukte både Ansa og Bansa



Gudaha caloosha libaaxii waxa ay ahayd wax laga baqo oo aad u madoow. «Hooyo, waxaan ku jirnaa caloosha libaaxii, kaalay oo na caawi! Hooyo, fadlan», ayey ku qeyliyeen. Laakiin si kasta oo ay u qeyliyeen, ridii iyaga dhashay ma maqli karin. Iyadu aad iyo aad ayey u fogeyd. Oo libaaxii isaga oo la liicliicaaya calooshiisii waynayd oo cusleyd ayuu ku noqday duurkii shaqo adag ka dib.

I magen til løven var det skummelt og helt bekmørkt. «Mamma, vi er i magen til løven, kom og hjelp oss! Mamma, vær så snill», ropte de. Men uansett hvor mye de ropte, så kunne ikke geitemammaen høre dem. Hun var langt, langt borte. Og løven vraltet tilbake til jungelen med den svære og tunge magen sin på slep.



Galabtii ayey soo noqotay ridii. Gurigii marnaa ayey dhinac kasta ka fiirisay. Halkaas wax shanqar ah ma jirin. Waxaraheedii ayey u yeertay. Cidna ma jawaabin. Waa ay fikritay «Maxaa dhici karay?». Ridii waa ay cabsatay oo waxa ay go'aan ku gaartay in ay aado tuuladii. Waa ay socotay, socotay, socotay oo ma aynan istaagin ka hor inta aysan ogaan kulaylkii ka soo baxayey dabkii birtumihii.

Om kvelden kom geitemammaen tilbake. Hun så seg rundt i det tomme huset sitt. Det var så stille der. Hun ropte på barna sine. Ingen svarte. Hun tenkte «Hva kan ha hendt?». Geitemammaen ble redd og hun bestemte seg for å gå inn til landsbyen. Hun gikk og gikk og gikk, og hun stanset ikke før hun kjente varmen fra ilden til smeden.



Birtumihii waa istaagay oo waxa uu buruskiisii weynaa ku garaacay birtii ololaysay. Ridii ayaa weydiisay: «Birtume, birtume, haddii aan caanahayga kuu liso ma ii sameyn kartaa labo geesood oo mudac ah oo bir laga sameeyey?” Birtumhihii waa ogolaaday arintii, oo waxa ay heshay labo geesood oo mudac ah oo bir laga sameeyay kuwaas oo ay ku rakibatay geesaheedii.

Smeden sto og slo på glødende jern med den store slegge si. Geitemammaen spurte ham: «Smed, smed, hvis du får melk av meg, kan du da lage to spisse horn av jern til meg?” Det gikk smeden med på, og snart hadde hun to spisse horn av jern som hun satte oppå sine egne horn.



Ridii waxa ay iyada oo wadata geesaheedii mudaca ahaa aaday duurkii. Waa ay socotay oo waa ay socotay oo waa ay socotay.

Geitemammaen gikk inn i jungelen med de nye spisse hornene sine. Hun gikk og hun gikk og hun gikk.



Ilaa ay ka aragtay : Yeey weyn oo khatar ah! Ridii ayaa weydiisay yeeydii «Ma cuntay Ansa, oo ma cuntay Bansa? Haddii ay saa tahay, kaalay aan dagaalno!» Yeeydii waxa ay ku jawaabtay: «Maya, anigu ma cunin Ansa, oo anigu ma cunin Bansa, Saa darteed isma dagaalayno.» «Hadaba mayal,» ayey tiri ridii oo waa iska sii socotay. Oo waa socotay oo waa socotay oo waa socotay.

Helt til hun så: En stor og farlig ulv! Geitemammaen spurte ulven: «Har du min Ansa spist, og har du min Bansa spist? Om så, la oss slåss!» Ulven svarte: «Å nei, jeg har ikke din Ansa spist, og jeg har ikke din Bansa spist, så vi skal nok ikke slåss.» «Nei vel,» sa mammaen og gikk videre. Og hun gikk og hun gikk og hun gikk.



Ilaa ay ka aragtay : Madaxkuti weyn oo khatar ah!
Ridii ayaa weydiisay madaxkutigii «Ma cuntay Ansa ahayd, oo ma cuntay Bansa? Haddii ay saa tahay, kaalay aan dagaalno!» Madaxkutigii waxa uu ku jawaabay: «Maya, anigu ma cunin Ansa, oo anigu ma cunin Bansa, Saa darteed isma dagaalayno.» «Hadaba mayal,» ayey tiri ridii oo waa iska sii socotay. Oo waa socotay oo waa socotay oo waa socotay.

Helt til hun så: En stor farlig bjørn! Geitemammaen spurte bjørnen: «Har du min Ansa spist, og har du min Bansa spist? Om så, la oss slåss!» Og bjørnen svarte: «Å nei, jeg har ikke din Ansa spist, og jeg har ikke din Bansa spist, så vi skal nok ikke slåss.» «Nei vel,» sa mammaen og gikk videre. Og hun gikk og hun gikk og hun gikk.



Waxa ay aragtay: Libaax weyn oo khatar ah! Kaas oo lahaa calool aad u weyn! Ridii ayaa weydiisay libaaxii «Ma cuntay Ansa, oo ma cuntay Bansa? Haddii ay saa tahay, kaalay aan dagaallanno!»

Helt til hun så: En stor farlig løve! Med en kjempestor mage! Geitemammaen spurte løven: «Har du min Ansa spist, og har du min Bansa spist? Om så, la oss slåss!»



Libaaxii waxa uu ku jawaabay:
«Grrrr.... Haa waa cunay Ansa, oo
haa waa cunay Bansa, hadaba
kaalay mar labaad, kaalay aan
dagalaanno»

Løven svarte: «Grrrr.... Ja, jeg har
nok din Ansa spist, og jeg har
nok din Bansa spist, så kom igjen,
la oss slåss!»



Libaaxii iyo ridii aad ayey isku dagaaleen. Ridii waxa ay geesaheedii birta ah ku mudday calooshii libaaxa ka dibna calooshii ayaa dilaacday.

Løven og geitemammaen føk på hverandre. Geitemammaen stanget de to jernhornene sine inn i magen på løven så magen ble flerret opp.



Calooshii waxaa ka soo baxay
Ansa iyo Bansa oo
labadooduba aad ayey u
caafimaad qabeen.

Ut av magen kom Ansa og
Bansa, og de var helt friske.



Ridii waa ay ku dhegtay labadoodiiba, oo waxa u qaadatay gurigii.
Geitemammaen omfavnet dem begge to, og tok dem med seg hjem.



Ridii waxa ay ka dalabtay Ansa iyo Bansa balan ah in aysan marna, marna markale aysan cid aan iyada ahayn ka furin albaabka. Sidaas ayey sheekhadu ku idlaatay.

Geitemammaen ba Ansa og Bansa love at de aldri, aldri mer skulle åpne døren for noen andre henne.

Snipp snapp snute, så er eventyret ute.



Animatør: Mats Grorud

Se flere fortellinger på morsmal.no